Barnaamijyada iyo Adeegyada

Caawinta luqadda waxaa laga heli karaa dhammaan **all** Barnaamijyada iyo adeegyada Xafiiska Sheriff ee degmada King (King County Sheriff's Office, KCSO) **barnaamijyada iyo adeegyada**, oo ay ku jiraan:

- **Adeegyada Degdegga iyo Badbaadada Dadweynaha:** Isgaarsiinta 911, baaritaanno, warbixinnada shilalka, warbixin online ah
- **Ruqsad iyo Diiwaanada:** Ruqsadaha bastooladaha qarsoon, adeegyada la xiriira hubka, codsiyada diiwaannada, waraaqaha caddeynta
- **Adeegyada Sharciga iyo Maxkamadda:** Amarada ilaalinta, ka saarista guryaha, waarannada maxkamadeed ee madaniga ah, gudbinta dukumentiyada sharciga
- **Adeegyada Bulshada iyo Taageerada:** Diiwaanka iyo raadinta dembiilayaasha galmada, Qaybta Jawaabta Daaweynta, shahaadooyinka U iyo T Visa

Lambarada telefoonku way kala duwan yihiin iyadoo ku xiran barnaamijka ama adeegga. Waxaan kugula talineynaa inaad booqato mareegaha keena si aad u hesho macluumaadka xiriirka ee barnaamijka aad isku dayeyso inaad gaarto.

Wax badan ka baro dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada KCSO ee: **kingcounty.gov/services**

Adeegyada booliiska KCSO ee bulshadaada!

Precinct 2
801 228th Ave SE, Suite 202
Sammamish, WA 98075
206-263-9133

Precinct 3
22300 SE 231st St.
Maple Valley, WA 98038
206-477-6446

Precinct 4
14905 6th Ave SW
Burien, WA 98166
206-477-2200

KCSO waxay u adeegtaa **aagagga aan hoos iman maamul magaalo oo ka tirsan King County** iyo **magaalooyin iyo hay'ado badan oo heshiis la leh**, oo ay ku jiraan Beaux Arts, Burien, Carnation, Covington, Kenmore, King County Int'l Airport, City of Maple Valley, Metro Transit, Muckleshoot, Newcastle, North Bend, Sammamish, SeaTac, Shoreline, Sound Transit, Skykomish, iyo Woodinville.

Degdegga iyo Warbixinta

- **Xaaladaha degdegga ah: Wac 911** La heli karo 24 saacadood maalintii. U sheeg qofka wicitaanka qaabilsan inaad u baahan tahay turjubaan.
- **Xaaladaha aan degdegga ahayn: 206-296-3311**
- **Wixii ku saabsan ka warbixinta onlaynka ah: kingcounty.gov/sheriff**

King County

SHERIFF
KING COUNTY

Helitaanka Luqadda

Baro adeegyada luqadda ee aad heli karto!

Buug yarahaan waxa lagu heli karaa luqado badan.

Baadh koodhka QR si aad u aragto turjumaadaha.

KCSO E-187 (5/26) Som

Xaqaaga helitaanka luqadda

King County Sheriff's Office (KCSO) wuxuu bixiyaa caawinta luqadda si qof kasta oo ka tirsan bulshada uu u heli karo adeegyadeena. Haddii aad ku dhibtooto hadalka, akhriska, qorista, ama fahamka Ingiriisiga, **waxaad xaq u leedahay caawinta luqadda oo bilaash ah.**

Caawinta luqadda waxaa lagu bixiyaa iyadoo la raacayo **Title VI of the Civil Rights Act of 1964** waxayna ka caawisaa in la hubiyo in dhammaan xubnaha bulshada ay si wax ku ool ah ula xiriiri karaan KCSO.

Helitaanka luqadda ayaa ka caawiya in qof walba ammaan ahaado. Badbaadadu waa mudnaantayada ugu weyn.

Qof kasta wuu heli karaa adeegyo iyadoon loo eegin xaaladda socdaalka.

Waa maxay adeegyada luqadda uu bixiyo King County Sheriff's Offic (KCSO)?

- **Tarjumaadaha qoraalka ah**, oo ay ku jiraan waraaqo, ogeysiisyo, foomam, iyo tilmaamo

- **Adeegyada turjumaadda**, iyada oo loo marayo muuqaal, telefoon, ama qof ahaan

- **Shaqaale iyo saraakiil laba-luqadood yaqaan oo la shahaadeeyay,** kuwaas oo laga heli karo luqado qaarkood

Xubnaha KCSO waxay weydiin doonaan haddii aad u baahan tahay caawimaad luqadeed marka ay kula falgalaan, sidoo kale waad codsan kartaa wakhti kasta.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adeegyada luqadda ee KCSO, fadlan nagala soo xiriir: kcsolanguageaccess@kingcounty.gov.

Taageerada luqadda waa muhiim gaar ahaan marka aad tahay:

- Waxaa wareystay ku xigeennada/saraakiisha
- Akhri xuquuqdaada
- Foomamka la siiyay si loo buuxiyo
- Si rasmi ah loo wareystay

Sideen u codsadaa taageerada luqadda?

Haddii aad u baahan tahay caawimaad la xiriirista KCSO, u sheeg ku-xigeen ama xubin kasta oo KCSO ah.

Haddii aad ku hadli karto xoogaa Ingiriisi:

- Sheeg: "Waxaan jeclaan lahaa turjumaan. Waxaan ku hadlaa [afkaaga]."

Xubinta KCSO waxay isticmaali doontaa Language Line si ay kuugu xiraan turjubaan xirfadle ah.

Haddii aanad ku hadlin Ingiriis gabi ahaanba:

- Xubinta KCSO waxay isticmaali doontaa buug yaraha "Tilmaan luqadaada" (Point to Your Language) ama app si uu u aqoonsado luqadaada.
- Xubinta KCSO waxay isticmaali doontaa Language Line si ay kuugu xiraan turjubaan xirfadle ah.

Waa maxay Khadka Luqadda?

Khadka Luqadda waa adeeg telefoon ama muuqaal ah oo xubnaha KCSO ay isticmaalaan si ay **si degdeg ah** kuugu xiraan turjubaan aqoon leh oo ku hadla in ka badan **240 luqadood**, oo ay ku jirto **Luuqadda Calaamadaha Maraykanka (American Sign Language, ASL).** Tani waxay noo ogolaaneysaa inaan kula xiriirno luqadda aad jeceshahay.

Waxaan garanayaa Ingiriis. Ma u baahanahay turjubaan?

HAA. Xitaa haddii aad wax yar ku hadli karto ama fahmi karto Ingiriisiga, turjubaan ayaa kaa caawinaya:

- Ka hortag ismaandhaafka
- Bixi macluumaad sax ah
- Faham xuquuqdaada sharciga ah
- Codso adeegyada sida adeegyada dhibbanaha ama foomamka la turjumay

Ma fiicantahay in la weydiisto turjubaan?

HAA. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu fahmo macluumaadka oo uu ku wada xiriiro luqadda uu ugu raaxada badan yahay.

Ma ilmahayga, xubin qoyskeyga, ama qof ag jooga ayaa ii turjumi kara?

MAYA. KCSO ma isticmaasho xubnaha qoyska, carruurta, ama dadka ag jooga sida turjubaan, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee khatarta badbaado ee degdegga ah, sida uu qeexayo siyaasadda KCSO.

Talo ku saabsan isticmaalka turjubaan

Markaad la xiriirto turjubaan

- Si tartiib ah oo jumlado gaagaaban ku hadal.
- Jooji marar badan si turjubaanku u hadlo.
- Is beddel hadalka. Ha isku dul hadlina.
- Weydii faahfaahin mar kasta.